



# Fahanka Gu'ga Ardaygaaga 2024 ee Maine ayadoo la Adeegsanaayo Warbixinta Buundada Imtaxaanka

## Cabirka Buundada Maine

Jaantusyada midabka leh, ee jiifa ee ku qoran warbixinta ardaygaaga ayaa muujinaaya buundada heerka ardaygaaga ee Maine. Buundadaan ayaa cabiraysa dedaalka ardaygaaga ee ku aadan imtaxaankaan ayadoo laga eegaayo xirfadaha muhiimka ah ee akhriska iyo xisaabta ee heerka fasalkiisa marka loo eego Heerarka Buundada Guud ee Gobalka.

Imtaxaanka akhriska ee fasalka 3-aad wuxuu cabiraa xirfadaha sida:

- Ka jawaabida su'aalaha ku saabsan sifooyinka, goobaha, iyo dhacdooyinka ku jira sheekada.
- Aqoonsiga casharka ku jira sheekooyinka dadkii hore iyo qisooyinka ka yimid dhaqannada kaladuwan.
- Helista fikirka guud iyo faahfaahinta ku jirta qoraallada xogta.
- Adeegsiga qaybaha qoraalka sida ciwaannada iyo erayada muhiimka ah si xog degdeg ah loo helo.

Imtaxaanka xisaabta ee fasalka 3-aad wuxuu cabiraa xirfadaha sida:

- Fahanka xeeladaha isku dhufashada iyo qaybinta tirooyinka ka hooseeya 100.
- Abuurista fahan ku aadan jajabyada.
- Abuurista fahan ku aadan qaababka safar xagalka iyo badka.
- Qeexida iyo qiimeynta qaababka labada qaybood ah.

Cabirka Buundada Maine ayaa la xiriirta heerka guusha oo qeexaaya sida waxqabadka ardaygu u waafaqsan yahay himilooyinka gobalka. Heerarka guusha ayaa Aad uga Hooseeya Filashada Gobalka, Ka Hooseeya Filashada Gobalka, Ku siman Filashooyinka Gobalka, iyo Ka Sareeya Filashooyinka Gobalka.

## Aalada Fahanka Heerka Guusha

[Aalada Fahanka Heerka Guusha](#) ayaa ku siinaysa xogta faahfaahsan ee heerarka gaarka ah ee waxbarashada oo lagu qiimeynaayo heerka fasal kasta iyo sida heerarkan loogu kala qaybiyo xirfadaha kaladuwan ee heerka kasta oo guusha kamid ah.



*Hel Aalada Fahanka Heerka Guusha*